

## **WARBIXIN KU SAABSAN XAQA ARDAYDA U DHASHAY LUUQADAHA LAGA TIRADA BADAN YAHAY AY U LEEYIHIIN IN AY GAAR U BARTAAN LUUQADA**

Waxbarashada luuqada gaarka ahi waxay ka kooban tahay 3 qaybood:

- Gaar u barasho af-noorweeji: Barasho noorweeji oo tayo leh.
- Duruusta oo labo luuqadood lagu dhigayo: Ku barid duruusta af-noorweejiga iyo ardayga luuqadiisa hooyo oo macalin labo luuqadle ah ku barayo  
Wax ku barid afka hooyo
- Barida afka hooyo:

Waxa uu dhigayaa sharciga waxbarashada qodobkiisa 2-8 iyo 3-12 ee gaar u barashada luuqada ee ardayda ku hadla luuqadaha laga tirada badan yahay:

Ardaya [dugsiyada dhexe /sare ] ee leh luuqad aan ka ahayn noorweeji iyo saami waxa ay xaq u leeyihiin waxbarasho af-noorweeji ah oo gaara ilaa iyo ay awoodooda luuqada noorweejigu ay gaadhayso heer ay kula socon karaan waxbarashada caadiga ee dugsiga. Haddii laga fursan waayo waxa ay kaloo xaq u leeyihiin ardayda noocaasi in afkooda hooyo loo dhigo ama labada luuqadood wax lagu baro ama labadaba la isugu daro.

Barashada afka hooyo waxa lagu dhigi karaa dugsi aan ahayn ka ardaygu caadiyan uu dhigto.

Haddii macalimiinta dugsigu aanay aqoon u lahayn in ay dhigaan afka hooyo ama waxbarashada ku baxaya labo luuqadood , waa in ay [degmada ] sida ugu macquulsan ugu habeeyaan waxbarasho ku haboon ardaydaa.

Barashada noorweejiga ee gaarka ahi waxa loogu talo galay ardayda aqoontooda noorweejiga ay hooseeso oo aan la socon karin casharada ku baxaya noorweejiga. Barida afka hooyo iyo madooyinka ku baxaaya labo luuqadood waxa la siiyaa haddii ardaygu uu u baahan yahay oo waa xaq ay leeyihiin ardayda cusub iyo ardayda kale ee laga tirada badan yahay kuwaas oo awoodooda noorweejigu ay aad u xuntahay taas oo keenta in aanay la socon karin casharada ku baxaaya noorweejiga.

Hiirsiga waxbarashada gaarka ah ee luuqada ayaa waxa ay tahay in ardaygu sida ugu dhakhsaha badan uu ugu wacnaado noorweejiga si uu ula qabsado waxbarashada caadiga ah. Marka ardaygu noorweeji ku filan uu barto, waxa aan loo sii baahan doonin waxbarashada gaarka ah ee luuqada.

Maxaa dhacaya marka uu dugsigu ku taliyo waxbarashada luuqada ee gaarka ah?

- Dugsigu waxa uu qiimeenayaa ardayga aqoontiisa af-noorweejiga
- Dugsigu waxa uu la sii socod siinayaa ardayga/waalidka oo wuu weydiinayaa rabitaanka codsi waxbarasho luuqadeed ee gaarka ah.
- Ardayga/waalidka ayaa ama ogolaanayo ama diidayaa in ay ogolaadaan, jawaabtana ku celinaya dugsiga.
- Dugsiga ayaa go`aan ka gaaraya haddii ardayga/waalidku ay ogolaadeen, ogolaanshaha rasmiga ahna waxa ay u dirayaan ardayga/waalidka.

- Haddii uu ardaygu/waalidku diiday in uu ogolaado, dugsigu go`aan ma gaadhayo. Ardayguna waxa uu la sii socon doonaa waxbarashada caadiga ah ee noorweejiga ah.
- Ardayga/waalidku wey ka dacwoon karaan go`aanka.

Maxaa dhacaya haddii ardayka/waalidku uu dalbado waxbarasho luuqadeed gaar ah?

- Ardayga/waalidka aya codsi u diraya dugsiga.
- Dugsiga aya qiimeenaya ardayga heerka awoodiisa noorweejiga.
- Dugsiga aya ka baaraan dagaya in ardaygu uu u baahan yahay waxbarasho luuqadeed gaar ah iyo in kale.
- Dugsiga aya goaan gaadhaya.
- Ardayga/waalidka wey ka dacwoon karaan goaanka.